



# Mycoplasma genitalium

**Mycoplasma genitalium** waa bakteeri oo lagu kala qaado galmada siilka iyo futada iyo xubnaha galmada oo waxey xubnaha galmada ku ridaan infekshan, wuxu leeyahay astaamaha kalamiidiya, laakin badanaa waa astaamom la'aan. Infekshankaan waa kala bar infekshanka kalamiidiya inta jeer oo laga helo dadka lagu baaro qeybaha isbitaalka oo qaabilsan infekshanada galmada ku faafo.

**Mycoplasma genitalium** waxey ku jiri kartaa kaadi mareenta, siilka iyo futada, oo sidaas daraadeed waxey keeni kartaa infekshano aan fududeen sida camal infekshanka makaanka uu dumarka, iyo ragga infekshanka xaniinyaha. Marmar dhifna infekshanka indhaha. Laakin kuma dhaco luqunta.

## Astaamaha mycoplasma

Astaamihiisa waa sida camal infekshanka kalamiidiya. **Mycoplasma genitalium** wuxu keena xannuunka kaadi marteenka oo ragga iyo dumarka, xanfafaf markaa kaadineysid, cuncun iyo marar dhacaan. Dumarka waxey isku arkikaran dhacaan ka imaanaayo siilka, dhiig oo dhaxeeyo waqtiyada caadada iyo xannuun xudunta hoosteeda. Ragga infekshanka xaniinyaha, oo bararaayo iyo xannuun badan yeelanaayo.

## Baaritaan

Baaritaanka **mycoplasma genitalium** waxa habboon kaliya in la suubiyoo markii astaamihiisa la isk arko iyo astaamaha infekshanka. Hal isbuuc kadib waqtiga lagugu daartay baa bakteeriyada baaritaanka lagu arkiikara. Ragga dhacaan kaadi baa laga qaadi, dumarka dhacaan kaadi iyo dhacaan siilka iyo makaanka baa laga qaadi. Dhacaan waa laga qaadi-kara xitaa futada hadii aad galmo futo suubisay iyo dhacaan baa indhaha laga qaadi infekshanka indhaha.

## daaweyn

Infekshanka **mycoplasma genitalium** waxaa lagu daaweeyaa antiibiotiga uu dhakhtar qoray. Daaweeynta loogu talagalay kalamiidiya caadiyan wax kama tarto **mycoplasma genitalium**. Daaweeynta ma ahaan bilaash maadaama cudurka uusan kamid eheen cudurada ku qoran sharciga difaacida cudurada. Aad bey muhiim u tahay inaa galmo suubin ama xubno galmo oo qofkale taaban inta daaweeynta kugu socoto. Baaritaan kontaroolid waxaa la suubin kara saddax ilaa afar isbuuc kadib markii daaweynt kuu dhammaato. Waa dhacdaa in daaweeynta ey wax ka tari weeydo qofka, oo inaa markaas antiibiotigo kale la isticmaalaa.

Haddi aad la nooshahay hal qof sii joogto ah, weey habboon tahay in asaga ama ayada xitaa baaritaan laga qaadaa iyo la daaweeya, hadii kale waxaa halis ah in adiga infekshanka dib kuugu dhaco markaa daawada dhameysatid.

## Waa muhiim inaa ku fakirtaa markey noqoto mycoplasma

Adiga wuu kugu dhici kara infekshanka **mycoplasma genitalium** dhowr jeer

**Mycoplasma genitalium** waxa lagu arkay makaanka iyo meesha ukunta, laakin ma u ahaan caadiyan sida kalamiidiya. Bakteeriyada waxa xitaa laga helay infekshanka ragga uga dhaco xanniinyaha. Maadaama cudurka aqoon badan laga leheen, uu nugu cusub yahay, wax kama dhihi karno hadii uu carruur dhalitaanka yareynaayo.

